## Casharka 29

1. Miyaa reer binu Israa'iil ay rumaysteen Hadalkii Ilaah ee uu Muuse kula hadlay?
-Haa.

2. Haddii aynaan rumaysanin Hadallada Ilaah, maxaynu Ilaah ugu yeeraynaa?
-Beenaale.

3. Miyaa Ilaah badbaadinayaa kuwa aan rumaysnayn Hadallada Ilaah?
-Maya.

4. Muxuu Fircoon yiri markii Muuse u sheegay in Rabbigu amar ku bixiyey inuu dadka sii daayo?
-Fricoonwuxuu yiri, "Garan maayo Rabbiga, oo dadkana tegi maayaan."

5. Miyaa Ilaah garanayey in Fircoon aanu reer binu Israa'iil sii daynaynin?
-Haa.
-Ilaah waxa waliba wuu garanayaa intaanay billaaban ka hor.

6. Maxaa Ilaah u go'aansaday inuu awooddiisa weyn Fircoon iyo reer Masar tuso?
-Si ay Masriyiintu ku gartaan in isaga oo keliya uu ahaa Ilaaha dhabta ah.

7. Sidee baa Ilaah Masriyiinta iyo reer binu Israa'iilba ugu muujiyey awooddiisa?
-Ilaah wuxuu belaayooyin u soo diray Fircoon iyo Masriyiinta.



8. Maxay belaayooyinkaasu ahaayeen?
-Ilaah wuxuu webigii u rogay dhiig.
-Ilaah wuxuu soo diray rah badan si ay u dhibaan Masriyiinta.
-Ilaahwuxuu soo dirayinjir cunta reer Masar.
-Ilaah wuxuu soo diray qaniin bada oo cuna masriyiinta.
-Ilaah wuxuu dilay loodii Masar.
-Ilaah wuxuu soo diray ka soo bax reer binu Israa'iil oo dhan dhib u keena.
-Ilaah wuxuu kaloo soo diray baraf dhagaxyo wata si uu ku baabi'iyo beerihii Masriyiinta.
-Ilaah wuxuu kaloo soo diray gudcur si Masriyiinta aanay u awoodin inay wax arkaan.

9. Muxuu haddaba Fircoon lahaa wakhti waliba ee Ilaah beyaalo soo diro?
-Wuxuu Fircoon ku oran jiray Muuse, reer binu Israa'iil waan sii dayn doonaa.

10. Muxuu Fircoon samayn jiray mar kasta ee belaayada laga qaado?
-Fircoon wuxuu diidi jiray in reer binu Israa'iil tagaan.

11. Maxaa belaayooyinkan ay u geli waayeen dhulkii Israa'iil?
-Waayo wuxuu Ilaah ballan qaaday in Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub uu barakadayn doono, oo uu ka dhigi doono qruun weyn.

-Waayo Ilaah wuxuu Fircoonkii reer Masar iyo Israa'iiliy-iintaba tusayey in isaga oo keliya uu Ilaah yahay, oo uusan mid kale jirin.

12. Maxaa ku dhici doona kuwa Ilaah la dagaallama?
-Ilaah baa burburin doona iyaga.

-In kastoo Ilaah sagaal belaayo u soo diray Fircoon iyo Masriyiinta, miyaa Fircoon reer binu Israa'iil sii daayey?

-Maya.

-Miyaanu Ilaah ogayn in Fircoon diidi doono inuu oggolaado in reer binu Israa'iil tagaan?
-Haa.

-Ilaah mar waliba wuu garanayey in Fircoon diidi doono in Israa'iil tagaan.

-Weliba ka hor intaanu Ilaah u yeerin Muuse inuu hoggaamiyo Isra'aiil aawadeed, ayaa Ilaah garanayey in Fircoon diidi doono inuu dadka u oggolaado inay tagaan.

-Ilaah wax waliba intaanay dhicin ayuu og yahay.

-Miyaa haddaba Fircoon Ilaah la dagaalamayaa oo haddana guulaysanayaa?

-Maya.

-Miyaa qofi Ilaah la dagaallami karaa oo guulaysan karaa?
-Maya.

-Wax kastoo la sheegaba, dadku ma istaajin karo shaqada Ilaah.

-Wax kastoo dadku sameeyaba, haddana awood uma lahan ay ku joojiyaan shuqulka Rabbiga.

-Haddii Ilaah go'aan gaaro, mar waliba go'aankiisa wuu



dhamaystirayaa.

-Ilaah wuxuu soo dirayaa belaayo kale dabadeedna Fircoon wuxuu u oggolaan doonaa in reer binu Israa'iil ka tagaan dhulkiisa.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 11:1.

1-Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Weli belaayo kale ayaan Fircoon iyo Masar ku soo dejin doonaa; oo dabadeedna wuu idin sii dayn doonaa inaad halkan ka tagtaan, oo markuu idin sii daayo, giddigiin ayuu halkan idinka sii wada eryi dooaa.

-Maxay ahayd belaayada Ilaah soo diri doono?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 11:4-7

4-Muusena wuxuu yihdi, Waxaa Rabbigu leeyahay, Habeenbadhka baan dalka Masar ku dhex soconayaa.
5-Oo curadyada dalka Masar jooga oo dhammu way wada dhiman doonaan, curadka Fircoon oo ku fadhiya carshigiisa, ilaa la gaadho curadka gabadha addoonta ah oo ka dambaysa dhagaxshiidka, iyo curadyada xoolaha oo dhan.
6-Oo waxaa dalka Masar oo dhan jiri doonta oohin eyn, taas oo kale aan hore loo arag, hadda kaddibna aan la arki doonin marnaba.
7-Laakiinse reer binu Israa'iil dad iyo duunyo toona xataa eeyna afka u kala qaadi maayo, si aad u ogaataan in Rabbigu kala duway Masriyiinta iyo reer binu Israa'iil.

-Haddaba Belaayada ugu dambaysa ee Ilaah soo dirayo waa tan laynaysa curadyada ilmaha Msriyiinta iyo loodooda.

-Maaddaama belaayada ugu dambaysa ay naxdin badan tahay, haddana Ilaah amar buu siinayaa reer Binu Israa'iil si iyana ayan carruurtooda u lumin ama dhimanin.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:1 & 3-5

1-Oo Rabbigu wuxuu Muuse iyo Haaruun kula hadlay dalka Masar, oo ku yidhi.

3-Shirka reer binu Israa'iil ood han la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa, Maalinta tobnaad oo bishan waa in nin waluba wan qaataa sida reeraha aabbayaashood yihiin, qooys waluba wan ha qaato.

4-Oo haddii qooys uusan wada qaadan karin wan, de markaas waa in isaga iyoderiskiisa oo ah kan qooyskiisa ku xiga ay mid wada qaataan oo ay u qaybsadaan sida tirada dadku tahay; nin walba sida cuntadiisu tahay waa inaad u tirisaan kalaqaybinta wanka.

5-Wankiinnu waa inuu ahaadaa mid aan iin lahayn, waana inuu ahaadaa mid lab oo sannad jiray, waana inaad wananka ama orgiyaasha ka bixisaan.

-Ilaah wuxuu amray in nin waliba ee ka mid ah qoysaska reer binu Israa'iil inuu doorto wan ama orgi gu' jir ah.

-Ilaah wuxuu kaloo amray in orgiga ama wanka gu' jirka ah aanu iin lahaanin.

-Maxaa Ilaah dadka ugu amray in wanka ama orgiga gu' jirka ah inaanu iin lahaanin?

-Waayo Ilaah waa kaamil.



-Waayo wax waliba ee Ilaah yiraahdana waa kaamil.

-Ilaahwuxuu aqbalayaa oo keliya orgi ama wan gu' jir ah oo aan innaba wax iin ah lahayn.

-Ilaah ma aqbali doono allabariga neef jirran.
-Ilaah ma aqbali doono wleiba allabbariga neef la dhaawacay.

-Miyaad haddaba xusuusataa orgihii Ilaah keynta keenay si uu u galo booskii Isxaaq?

-Maxaa orgiga keynta geesaha loogu geliyey?

-Waayo Ilaah waa kaamil.
-Waayo Ilaah wuxuu aqbalayaa oo keliya allabbari kaamil ah.

-Haddii reer binu Israa'iil ay ahayd in laga badbaadiyo dhimashada, maxay ahayd waxa la doonayey inay ka feejignaadaan?

-Waxay ahayd inay addeecaan Amarka Ilaah.

-Waxay ahayd inay soo wataa orgi ama wan gu' jir ah oo aan innaba iin lahayn.

-Maxaa kale ee Ilaah ku amray reer binu Israa'iil inay sameeyaan?

Bal aynu akhrinno baxniintii 12:6

6-Oo waa inaad gooni u xidhaan ilaa bisha maalinteeda afar iyo tobnaad; oo ururka shirka reer binu Israa'iil oo dhammu waa inay markhribkii qalaan.

-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil ku amray inay wanka ayan taaban ilaa laga gaaro 14ka bisha.

-Maalinta afar-iyo-tobnaad ee bisha, Ilaah wuxuu amray in reer binu Iraa'iil ay gowracaan wanka ama orgiga fiidnimada maalintaas.

-Ilaah wuxuu amray in wanka la gowraco.
-Waxaa Ilaah Amray in wanka uu dhinto.

-Maxaa Ilaah u amray in wanka uu dhinto?

-Waxaana taasi ay reer binu Israa'iil xusuusinaysaa in ciqaabta Ilaah u dhigay dembiga ay tahay dhimasho.

-Ka hor intaan Aadan iyo Xaawo dembaabin, dhimasho lagama aqoonin dunida.

-Dembigii Aadan iyo Xaawo dartii, ayaa dhimashadu dunida ku soo gashay.

-Maadaama Aadan iyo Xaawo ay dembaabeen, ayaa dhimashadu soo gaartay dadka ood han.

-Ilaah wuxuu kaloo amar ku bixiyey in reer binu Israa'iil ay weel u hooriyaan dhiigga neefka.

-Haddii reer binu Israa'iil ay doonayaa inay ka badbaadaan dhimasho, waxay ahayd inay u fiirsadaan oo addeecaan sharciga Rabbiga.



-Waxay ahayd inay gawracaan wanka ama orgiga gu' jirka ah, iyo inay dhiiggiisa ku shubaan weel.

-Maxaa haddaba Ilaah ku amray reer binu Israa'iil inay dhiigga ka yeelaan?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:7

7-Oo waa inay dhiigga wax ka qaataan, oo ay mariyaan fayaaradda labaabka labadeeda dhinac, iyo meesheeda sare oo ah guryaha ay wax ku dhex cuni doonaan.

-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil ku amray inay dhiigga weelka lagu shubay ay marsadaan fayaaradaha guryahooda, iyo inay hilibka wanka ama orgiga cunaan habeenkaas.

-Waa dhiigga wanka waxa reer binu Israa'iil ka badbaadiyey ciqaabta Ilaah.

-Haddii reer binu Israa'iil haddaba ay doonayaa inay ka badbaadaan dhimasho, dabadeeto waa inay ka taxaddaraan inay Ilaah addeecaan.

-Waana inay Dhiigga mariyaan labada dhinac ee fayaaradaha guryahooda marka hilibka neefkana la doonayo inay habeenkaasba dhammaystaan.

-Maxaa kale ee Ilaah ku amray reer binu Israa'ii?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:22b

22-Oo midkiinna ilaa waagu ka beryo yuusan albaabka

gurigiisa dibadda uga bixin.

-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil ku amray inay guryahooda joogaan iyadoo dhiiggu marsan yahay fayaaradaha guriga labadiisa dhinac ilaa waagu ka baryo.

-Reer binu Israa'iil waxay ahayd inay gudaha ku jiraan marka dhiigga ay mariyaan iriddda labadeeda dhinac ee dibadda ah.

-Dhiigga fayaaradaha dibadda la marinayo ayaa reer binu Israa'iil ku qarinaya gudaha.

-Haddii reer binu Israa'iil ay ahayd inay badbaadaan, dabadeeto waa inay ka taxaddaraan inay raacaan amarka Ilaah.

-Oo waxay ahayd inay gudaha ku jiraan iyadoo dhiiggu marsan yahay fayaaradaha ilaa laga gaaro subaxnimada.

-Maxaa kale ee Ilaah ku amray reer binu Israa'iil?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:46b

46-Lafna waa inaydaan ka jebin.

-Ilaah wuxuu ku amray reer binu Israa'iil ianayan laf ka jebinin wanka ama orgiga ay cunayaan.

-Haddii reer binu Israa'iil ay ahayd inay dhimasho ka badbaadaan, waxay ahayd inay aad iyo aad uga taxaddaraan inay raacaan amarka Ilaah.

-Lafna waa inaydaan ka jebin.



-Ilaah wuxuu reer binu Israa'iil u sheegay inay sameeyaan isla sida uu ku amray.

-Haddii reer binu Israa'iil ayan wax waliba u samaynin sida Ilaah ku amray, maxaa ku dhacaya iyaga?

-Belaayo ayaa ku dhacaysa, oo waxaa dhimanaya curadkooda kowaad.

-Ilaah wuxuu badbaadinayaa curadyada reer binu Israa'iil haddii ay wax waliba u sameeyaan isla sidii Ilaah ku amray.

-Ilaah wuxuu badbaadinayaa reer binu Israa'iil haddii ay raacaan dariiqa Rabbiga.

-Miyaa Ilaah aqbalayaa in Reer binu Israa'iil uu ku badbaadiyo qorsahyaashooda iyo dariiqa ay doortaan?

-Maya.

-Waa dariiqee kan keliya ee ina badbaadinaya?
-Waa dariiqa Ilaah.

-Maxaa dhacay markii Aadan iyo Xaawo ay dariiqooda raaceen oo dhar ay caleemo barde ka tosheen?

-Ilaah wuxuu diiday dharkii ay samaysteen.

-Maxaa dhacay markii kQaabiil uu raacay dariiqiisa oo uu diiday inuu qurbaanka u bixiyo sidii Ilaah doonayey?

-Ilaah wuxuu diiday allabbarigii Qaabiil.

-Dariiqa Ilaah waa kan keliya ee ina badbaadinaya.

-Haddii aynaan raacin Dariiqa Ilaah, dabadeeto Ilaah wuu ina diidayaa.

-Muxuu Ilaah ka ballan-qaaday reer binu Israa'iil haddii ay isaga addeecaan?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:12-14

12-Waayo, habeenkaas waxaan dhex mari doonaa dalka Masar, oo waxaan wada layn doonaa curaydyada dalka Masar oo dhan, kuwa dadka iyo kuwa duunyadaba, oo ilaahyada Masar ood han waxaan ku soo dejin dooaa xukummo. Aniga waxaana hay Rabbiga.
13-Oo dhiiggu wuxuu idiin noqon doonaa calaamo kor taal guryaha aad ku jirtaanba; oo markii aand hiigga arko, waan iska kiin kor mari doonaa, belaayo idin baabi'isaana idinkuma dhici doonto, markaan wax ku dhufto dhulka Masar.
14-Oo maalintanu waa inay xusuus idiin noqotaa, oo waa inaad Rabbiga u iiddaan. Waa inaad ka ab ka ab weligiin ku dhawrtaan iid amar ahaan.

-Haddii reer binu Israa'iil ay addeecaan amarka Rabbiga, muxuu Ilaah ka ballan-qaaday inuu u sameeyo?

-Ilaah wuxuu ballanqaaday in in Belaayada aanay iyaga u imanaynin, iyo inaanay curadyadoodu dhimanaynin.

-Miyaa reer binu Israa'iil Ilaah addeeceen?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:28



28-Markaasaa reer binu Israa'iil tageen oo sidaas yeeleen; sidii Rabbigu Muuse iyo Haaruun ku amray ayay yeeleen.

-Reer binu Israa'iil waxay sameeyeen wixii Ilaah ku amray inay sameeyaan.

-Haddii reer binu Israa'iil ay dooran lahaayeen inay wan ana orgi jirran allabbari ahaan u bixiyaan, miyaa Ilaah badbaadin lahaa?

-Maya.

-Haddii reer binu Israa'iil ay neef soo wadan lahaayeen, oo ayan gawrici lahayn, Ilaah miyuu badbaadin lahaa?

-Maya.

-Waxay ahayd in orgigu dhinto.
-Iyo in dhiigga wanka la daadiyo.

-Ilaah ma uusan doonayn in reer binu Israa'iil ay iloobaan in ciqaabta dembigu ay tahay dhimasho.

-Maxaa haddaba wixii habeenkaas ka dambeeyey dhacay?

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:29-30

29-Oo waxaa dhacday in habeenbdhkii Rabbigu laayay curaydyadii dalka Masar ood han, inta laga bilaabay curadkii Fircoon oo carshigiisii ku fadhiyey ilaa la gaadhay curadkii maxbuuska godxabsiga ku jiray, iyo curayadii xoolaha oo dhan.
30-Markaasaa habeenkaas waxaa kacay Fircoon iyo

addoommadiisii oo dhan, iyo Masriyiinta ood han; oo oohin aad u weyn baa Masar ka dhacday, waayo, ma jirin guri aan meyd oollin.

-Fircoon wiilkiisii curadka ahaa iyo curaydyadii Masriyiinta oo dhan ayaa wada baaba'ay.

-Curadyadii Loodii fircoon, iyo curadyadii Loodii reer Masarna way wada Baaba'een.

-Miyaa Ilaah dilay curadyadii Masriyiinta sidii uu yiri?
-Haa.

-Ciqaabta Ilaah ee dembiga waa dhimashada.

-Ilaah xukun buu saarayaa dembiyada oo dhan.
-Ilaah wuxuu dembiyada oo dhan ku ciqaabaa dembi.

-Markii Ilaah go'aansado inuu ciqaabo dembiga, ma jirto cid baxsanaysa.

-Miyaa haddaba mid ka mid ah curaydyadii Israa'iil la dilay?
-Maya.

-Maxaa loo dili waayey curaydyadii reer binu Israa'iil?

-Waayo reer binu Israa'iil waxay addeeceen Ilaah, oo waxay fayaaradaha albaabbadooda ka mariyeen dhiig labada dhinac.

-Isla orgigii kaynta kua jiray geesaha uu u galay booskii Isxaaq, ayaa wanka iyo orgigan ay qasheen qaysaska reer binu Israa'iil ay galeen booskii curaydayada Israa'iil.



-Maadaama reer binu Israa'iila y addeeceen Ilaah, miyaa Ilaah ballankiisii dhowray o uu kor maray guryihii reer binu Israa'iil?
Haa.

-Ilaah wuxuu xusuustay ballankiisii ahaa inuu hoggaamiyey reer binu Israa'iil oo uu ka wado Masar iyo gurigii addoonsiga.

-Ilaah wuxuu kaloo xusuustay ballankiisii ahaa in uu Badbaadiye ka soo dhex bixin doono qoyskii Ibraahim iyo Israa'iil.

-Reer binu Israa'iil waxay ahaayeen carruurtii Aadan iyo Xaawo, isla sida rreer Masarba ay uga soo farcameen Aadan iyo Xaawo.

-Reer binu Israa'iil, sila sida reer Masarba ay ahaayeen waxay ku dhasheen dembi.

-Reer binu Israa'iil way dembaabeen oo waxay u qalmmeen inay u dhintaan isla sida reer Masar.

-Ha reer binu Israa'iil waxay ku badbaadeen nimcada Ilaah.
-Waa nimcada Ilaah oo keliya tan qof waliba ku badbaado.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:31-36

31-Markaasuu Muuse iyo Haaruun u yeedhay
habeennimadii, oo wuxuu ku yidhi, Kaca, oo dadkayga ka dhex
baxa, idinka iyo reer binu Israa'iilba; taga oo Rabbiga u adeega,
sidaad u tidhaahdeen.
32-Oo adhyihiinna iyo lo'diinnaba kaxaysta, sidaad u
tidhaahdeen, iina soo duceeya.
33-Oo Masriyiintuna waxay dadka ku deddejiyeen inay
dhaqso uga saaraan dalka; waayo, waxay yidhaahdeen, Kulligeen

waxaynu nahay dad go'ay.

34-Markaasaa dadkii waxay qaateen cajiinkoodii intaanu khamiirin, iyo weelashoodii ay wax ku dhex cajiimi jireen oo intay maryahoodii ku xidheen ayay garbaha saarteen.

35-Oo reer binu Israa'iilna waxay yeeleen sidii Muuse eragiisu ahaa; oo wxay Masriyiintii weyddiisteen alaab lacag ah iyo alaab dahab ah iyo dhar.

36-Oo Rabbiguna Masriyiintii ayuu dakdii raalli uga dhigay, oo sidaas daraaddeed way u daayeein inay qaataan wixii ay weyddiisteenba. Oo iyana Masriyiintii way dheceen.

-Habeenkaas, Fircoon wuxuu u yeeray Muuse wuxuuna oggolaaday in reer binu Israa'iil ay dhulka ka baxaan.

-Fircoon waxay la noqotay inuu awood u leeyahay inuu la dagaallamo Ilaah.

-Ma jiro nin Ilaah ka adkaan kara.
-Mana jiro mid Ilaah ka joojin kara shuqulkiisa.

-Ilaah wuxuu badbaadinayaa kuwa dariiqiisa qaada.

-Ilaah wuxuu burburinayaa kuwa dariiqooda ama sharci-yadooda iska raaca.

Bal aynu akhrinno Baxniintii 12:51

51-Oo isla maalintaasaa Rabbigu reer binu Israa'iil uga bixiyey dalkii Masar, sida guutooyinkoodii ahaayeen.

-Ilaah wuxuu dhowray ballankiisii oo wuxuu reer binu Israa'iil ka soo bixiyey dhulkii Masar.



-Miyaa Fircoon Ilaah la dagaallamay oo uu guulaystay?
-Maya.

-Miyaa cidi Ilaah la dagaallami kartaa oo haddana ay guulaysan karaa?